# Dadka Naafada Ah iyo Kuwa Xabsiyada Ka Soo Baxa:

## Bilowga ama Dib U Bilowga Macaashka Dadka Naafada Ah ee Lambarka Bulshada

Disabled and Leaving Prison: Starting or Restarting Social Security Disability Benefits

### Ma Codsan Karaa Macaashka Lambarka Bulshada?

Haddii aad naafo tahay waxaa suurogal ah in aad codsan karto taageero lacageed oo aad ka hesho Maamaulka Lambarka Bulshada mid ama labadaba barnaamijyadan:

1. **Macaashka Kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada (SSI)** - Barnaamijkani waxa uu siiyaa lacago dadka 65-jirka ah ama ka weyn iyo dadka naafada ah ee danyarta ah.

2. **Macaashka Ceymiska Naafada ee Lambarka Bulshada (SSI)** - barnaamijka waxa uu gargaaraa ee shaqeeyey oo bixiyey canshuurta Lambarka Bulshada.

Lambarka Bulshada waxa uu ku qeexaa naafanimada qofka oo awoodiida jirkiisu ama tan maskaxeed xadidan tahay oo:

- qaadatay wax ka badan 12 bilood, ama
- la filayo in ay qaadato ugu yaraan 12 bilood, ama
- la filayo in ay qaadato wax ka badato 12 bilood, ama



la filayo in ay keeni karto dhimasho

**Laguna** siinayo macaashka:

- Haddii aad xabsi ku jirto
- Haddii naafanimadaadu la xiriirto isticmaalka maandooriyayaasha
- Ama aad horey xabsi u soo martay. Taasi ma aha naafanimo la aqoonsan yahay

**Ka Codso macaashka barta internetka: [www.ssa.gov/applyfordisability](http://www.ssa.gov/applyfordisability)**

### Macaashka Lagaa Joojiyo: Maxaa dhacaya haddii aan xabsi galo?

Haddii lagu xiro adiga oo qaadanay macaashka, waa lagaa joojinayaa macaashka mudada aad xiran tahay oo xabsiga aad u jirto. In uu kuu sii socdo iyo in kale waxa ay ku xiran tahay nooca macaashka naafada aad qaadan jirtay.

**Macaashka SSDI -** lacagta lagu siiyo waa la joojinayaa haddii dambi lagugu helo oo lagu xiro 30 maalmood amaka badan. Haddii ilmahaaga ama xaaskaaga ay qaataan SSDI oo laga siiyo xisaab Lambarkaaga Bulshada, lagama joojinayo. Iyada oo aan mudada aad xabsiga ku jireyso, lagaama qaadayo SSDI - ee waa la joojinayaa mudada aad xiran tahay.

**Macaashka SSI** - lacagta lagu siiyo waa la joojinayaa marka lagu xiro muddo bil ah. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in aan lacagta lagu siineyn mudada aad xabsiga ku jirto. Haddii aad xiran tahay 12 bilood oo xariga ah oo xiriir ah, waa lagaa qaadayaa oo lagaala noqonayaa SSI. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in lagaa doonayo in aad codsi cusub soo gudbiso si laguugu ogolaado. Waa in aad mar kale soo gudbisaa (cadeyn) muujineysa naafanimadaada *oo* aad ka soo baxday shuruudaha maaliyadda ee ku xiran barnaamijyada.
**Deletion here**

## Mala iga doonayaa in aan wargeliyo Lambarka Bulshada haddii aan xabsi galayo?

Maamulka xabsiga ayaa laga doonayaa in ay gaarsiiyaan Lambarka Bulshada in aad xiran tahay iyo goorta lagaa sii deynayo xabsiga. Haddii Lambarka Bulshada aanay ogeyn in aad xiran tahay, waxaa suurogal ah in ay kuu soo diraan jeegga lacagta. Maadaama aadan xaq u laheyn macaashka mudada aad xiran tahay, **waa in aad lacagtaas dib u soo celisaa.** Taas waxaa lagu magacaa "lacag khalad lagu qaatay."

Marka dib laguugu bilaabo macaashka, Lambarka Bulshada ayaa lacagta bil kasta ka jaraya ilaa lacagta dheeraadka ah ee lagu siiyey dhamaato.



## Dib U Bilowga Macluumaadka: Maxaan yeelayaa?

Nidaamka dib u bilowga macaashka waa mid muddo qaadata, waxa aad bilaabi kartaa 3 bilood ka hor inta aan xabsiga lagaa sii deyn. Sida aad dib ugu bilaabeyso macaashka waa mid ku xiran nooca macaashka aad qaadan jirtay.

**SSDI:**

Si aad dib ugu bilwodo macaashka **SSDI**, waa in aad ogaataa taariikhda lagu sii deynayo. Marka ay 3 bilood ka dhiman tahay taariikhda sii deyntaada, shaqaalaha kula shaqeynaya ayaa kaa caawinaya sida aad ula xiriiri laheyd oo aad sii deyntaada u gaarsiin laheyd Lambarka Bulshada.

Waxa kale oo aad soo wici kartaa Lambarka Bulshada ee 1-800-772-1213 si aad u soo gaarsiiso taariikhda sii deynta. Qofka aad la hadasho ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah.

Maalinta xabsiga lagaa siidaayo, sida ugu dhaqsaha badan u tag xafiiska Lambarka Bulshada adiga oo wata aqoonsi sawir leh iyo cadey muujineysa in xabsiga lagaa sii daayey. Tani waxa ay Lambarka Bulshada u ogolaaneysaa in ay kuu soo diraan lacagta. Waxaa lagaa doonayaa in aad u keento Lambarka Bulshada cinwaanka aad degan tahay.

Marka ugu horeysa oo jeegga SSDI aad heli karto bisha xigta bisha xabsiga lagaa soo daayey.

**SSI:**

Xusuusnoow, macaashka SSI oo la joojiyey wax ka badan 12 bilood waa laga noqday (buriyey). Si aad dib ugu bilowdo macaashka SSI oo laga noqday, waa in aad dib u codsataa oo aad cadeysaa in aad naafo tahay oo aad ka soo baxday shuruudaha maaliyadda ee ku xiran. Si ka duwan macaashka SSDI, ma codsan kartid macaashka SSI ilaa 30 cisho ay ka dhiman tahay

marka xabsiga lagaa sii deynayo. Weydii shaqaalaha kula shaqeynaya in ay kaa caawiyaan sida ay codsi cusub oo SSI u soo gudbin lahaayeen bil ka hor taariikhda sii deyntaada.

Haddii aad xabsi ku jirtay wax ka yar 12 bilood, oo aad dooneyso in aad **dib u bilowdo macaashka SSI oo lagaa joojiyey**, weydii shaqaalaha kula shaqeynaya in ay la xiriiraan Lambarka Bulshada bil ka hor soona gaarsiiyaan taariikhda lagu sii deynayo.

Waxa kale oo aad soo wici kartaa Lambarka Bulshada ee 1-800-772-1213 si aad u soo gaarsiiso taariikhda sii deynta.

Ama qofka wakiilka kaa ah ayaa tagi kara xafiiska Lambarka Bulshada haddii ay doonayaan in ay qoraal soo gudbiyaan. Qof qoyska ka tirsan ama saaxiib kula ah ayaa sidoo kale keeni kara iyaga oo sita warqad ogolaasho oo aad soo saxiixday.

## Dib U Bilowga Medicare iyo Medicaid

Marka la joojiyo macaashka naafada ama lagaala noqdo, waxaa laga yaabaa in sidoo kalay ay ku dhacdo kaarkaaga caafimaadka.



Dadka la siiyo macaashka **SSDI** waxa ay ceymiska caafimaadka ka helaan Medicare ka dib marka ay qaataan SSDI muddo 24 bilood (2 sano) ah.  Marka lagaa joojiyo lacagta SSDI xabsi oo aad ku jirtay dareed, waxaa sidoo kale la joojinayaa macaashka Medicare. Medicare dib ayaa laguugu bilaabayaa marka xabsiga lagaa sii daayo.

Dadka la siiyo **SSI** inta badan waxa ay ceymiska caafimaadka ka helaan Medicaid (Ceymiska caafimaadka ee gobolka MN oo u dhigma Medicaid). MA uma fido ceymiska caafimaadka dadka ku xiran xabsiyada - *marka laga reebo* haddii cisbitaalka lagu geeyo. Marka uu istaago macaashka SSI , ceymiska MA isna waa la joojinayaa, sidoo kale.

Xabsiga lagugu hayo ayaa laga doonayaa in ay kaa caawiyaan dib u bilowga ceymiska MA ee marka lagu sii daayo.  Weydii shaqaalaha kula shaqeynaya in ay la xiriiraan adeegga dadweynaha ee degmada aad degeyso si ay kuugu furaan bilaabaan marka kale ceymiska caafimaadka ee MA. La xiriir xafiiska adeegga dadweynaha waxa aad ka heli kartaa bogga internetka ee Waaxda Adeegga dadweynaha ee Minnesota, www.dhs.state.mn.us.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**